

FARIINTA WASIIRKA WASAARADDA H. MAALIYADA

Ugu horrayn waxa mahad oo dhan iska leh ALLAH ina- siiyay dhammaan nimcooyinka kala duwan ee aynu haysano oo aan tiro lagu koobi karin, innoona suurta galiyay in aynu dhammaysytirno “**Buugga Xogsidaha Cashuuraha-Berriga**” ee {Cashuurta iyo Cashuur-Bixiyaha}.

Marka labaad waxaan aad ugu faraxsanahay in uu dhammaystirmey buugga tacriifadaha cashuuraha berriga oo koobsanaya dhammaan tacriifadaha kala duwan ee ay ku hawl galaan xafiisyada cashuuraha berrigu, buuggani waxa uu si nidaamsan oo hufan u tusaya shaqaalaha cashuuraha berriga ee u idman dakhli ururintu inay ka helaan xogta iyo tilmaanta ay ubaahdaan ee ku saabsan cashuuraha kala duwan ee ay ka soo ururiyaan cashuur bixiyayaasha ay ku waajibtay cashuurtu.

Hadda ba ujeedada ugu weyn ee buugga xogsidaha cashuur bixiyahu uu xambaarsanyay waxa ay tahay “in ay helaan cashuur bixiyayaashu xog si ay uogaadaan amau hubiyaan xaddiga amanoocacashuureedeku waajibtay.”

Sidaa darteed waxa hada kadib u fududaan doonta cashuur bixiyaha inuu fahmo nooc kasta oo cashuureed oo looga baahan yahay iyo xadigeedaba oos iwaaf ah uga muuqata buugga xogsidaha cashuur bixiyaha.

Ugu danbayn, buuggani waxa uu faa’ido weyn u leeyahay nidaamka iyo hufnaanta adeega dakhli ururinta ee waaxdacashuurahaberrigu ugu xilsaarantay Wasaarada H/Maaliyadda iyada oo u qayb weyn ka tari doono in cashuur bixiyaha aanay wakhti badan ka qaadan hubinta iyo helida nooca ama xaddiga cashuureed ee ay bixinayaan. Sidoo kale waxa uu guud ahaan cashuur bixiyaha ka caawinayaan barashada ilaha kala duwan ee uu kaga waajibi karo dakhli ama cashuur.

Wasiirka Wasaaradda H. Maaliyadda
Dr. Sacad Cali Shire



TUSMADDA BUUGA

1	Tirsiga Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha (Tin)	2
1.1	Nidaamka Isdiiwaangelinta	2
1.2	TIN-Ka iyo Cashuuraha waajibay	2
1.3	Isticmaalid La'aanta Namabarka Tix-Raaca Cashuureed.....	3
2	Soo Xareynta Xisaab-Celinta Cashuuraha	4
3	Macluumadka Cashuuraha Waa Weyn	5
3.1	Cashuurta Shaqaalah.....	5
3.1.1	Maxay tahay cashuurta shaqaaluhu?.....	5
3.1.2	Waa imisa tacriifadda cashuurta shaqaalahu?.....	5
3.1.3	Side loo bixiyaa cashuurta shaqaalaha?.....	5
3.1.4	Haddii aan la daaho maxaa dhacaya?.....	5
3.2	Cashuurta Macaashka Ganacsiga	6
3.2.1	Waa maxay cashuurta macaashka ganacsigu?	6
3.2.2	Waa imisa tacriifadda cashuurta macaashka ganacsigu?.....	6
3.2.3	Side loo bixiyaa cashuurta macaashka ganacsiga?	6
3.2.4	Maxaa dhacayahadii aan la daaho?	6
3.3	Cashuurta Kiradda Daaraha	7
3.3.1	Maxay Tahay Cashuurta kiradda daaraha?	7
3.3.2	Waa imisa tacriifadda cashuurta kiradda daarahu?.....	7
3.3.3	Side loo bixiyaa cashuurta shaqaalaha?.....	7
3.3.4	Maxaa dhacaya hadii aan la daaho?	7
3.4	Cashuurta libka Adeega Iyo Alaabta	7
3.4.1	Maxay Tahay Cashuurta kiradda daaraha?	7
3.4.2	Waa imisa tacriifadda cashuurta libka Adeega Iyo Alaabta?	7
3.4.3	Side loo bixiyaa cashuurta libka Adeega Iyo Alaabta?.....	7
3.4.4	Maxaa dhacaya hadii aan la daaho?	7
3.5	Cashuurta Ka Reebka Madeganyaasha	8
3.5.1	Maxay tahay cashuurta Ka Reebka Madeganyaasha?	8
3.5.2	Waa imisa tacriifadda Cashuurta Ka Reebka Madeganyaasha?	8
3.5.3	Side loo bixiyaa cashuurta Ka Reebka Madeganyaasha?	8
3.5.4	Maxaa dhacaya hadii aan la daaho?	8
3.6	Cashuurta Kala Wareejinta	8
3.6.1	Maxay Tahay Cashuurta kala wareejinta ?	8
3.6.2	Waa imisa tacriifadda Cashuurta kala wareejinta?	8

3.6.3	Side loo bixiyaa cashuurta Kalawareejinta?	8
3.7	Cashuurta Mashaariicda /Qandaraasyada	9
3.7.1	Maxay Tahay Cashuurta mashaariicda/qandaraasyadda ?	9
3.7.2	Waa imisa tacriifadda mashaariicda/qandaraasyadda ?	9
3.7.3	Side loo bixiyaa cashuurta mashaariicda/qandaraasyadda ?	9
3.8	Cashuurta wado-marista gaadiidka	9
3.8.1	Maxay tahay cashuurta waddo-marista gaadiidku?	9
3.8.2	Waa imisa tacriifadda cashuurta waddo-marista ?	9
3.8.3	Side loo bixiyaa cashuurta waddo-marista gaadiidku?	9
3.9	Cashuurta Moorka (Stamp Tax)	10
3.9.1	. Tacriifadda Cashuurta moorka	10
3.9.2	waa imisa Nooca Cashuurta ?	10
4	Ajuurooyinka Adeegyadda Kale Duwan Ee Dawladda	10
4.1	Ajuuradda liisamadda ganacsiga	10
4.1.1	Waa maxay ajuuradda Liisamada Ganacsigu?	10
4.1.2	Waa imisa tacriifadda ajuurooyinka liisamadda ganacsigu?	10
4.1.3	Side loo bixiyaa ajuurooyinka liisamadda ganacsigu?	10
4.1.4	Noocyadda Ganaax ee la xidhiidha liisanka ganacsiga	11
4.2	Ajuuradda Dal-Ku-Joogga 'Fiisaha Deggennaanshaha'	12
4.2.1	Waa maxay ajuuradda Dal-Ku-Joogga 'Fiisaha deggennaanshaha'?	12
4.2.2	Waa imisa tacriifadda ajuurooyinka Dal-Ku-Joogga 'Fiisaha Deggennaanshaha'?	12
4.2.3	Side loo bixiyaa ajuurooyinka Fiisaha Deggennaashaha?	12
4.2.4	Hadii iiga dhaco fiisaha deggennanshahu maxaa igu dhacaya?	12
4.3	Ajuuradda Ogolaanshaha Shaqo (Work Permit)	13
4.3.1	Waa maxay ajuuradda Ogolaanshaha Shaqo (Work Permit)?	13
4.3.2	Side loo bixiyaa ajuurooyinka Ogolaanshaha Shaqo (Work Permit)?	13
5	Xafiisyadda Cashuuraha Berriga	14
5.1	Xaggee Ayey Ku Yaallaan Xafiisyada Cashuuraha Berrigu?	14
5.2	Wakhtigee ayey shaqeeyaan xafiisyada cashuuraha berrigu?	14
5.3	Ciwaannadee ayaan kala xidhiidhi karaa xafiisyada cashuuraha berriga?	14
5.4	Xaggee ayaan ka heli karaa xog ama maclumaad cashuureed?	14

Ujeedada Xogsidaha (Cashuurta & Cashuur-Bixiyaha)

Ujeedada dhiganahani waxa ay daaran tahay, sidii guud ahaan bulshada gaar ahaana cashuur-bixiyaha fahan ama xog looga siin lahaa cashuuraha, hadii ay tahay tacriifaddaha sharcigu sargooyey, inta jaad/qaybood ee ay ka koobanyihiiin cashuuruhu, qeexitaanka mid kasta, xiliyada ay waajibto, cida ay ku waajibto, ganaaxyada iyo arimaha kale ee ka dhalan kara marka xiligeeda lagu bixin waayo.

Sida aad ka dheehan doontid marka aad gudaha u sii gasho buugan, waxa si gaar ah diirada loogu saaray cashuuraha tooska ah marka laga tago cashuurta iibka ee adeegyada iyo alaaboo yinka oo iyadu ah cashuur dadban. Sidaa darteed xogsidahan qayb kama aha cashuuraha dadban ee lagu qaado kastamada.

1 Tirsiga Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha (Tin)

Tirsiga aqoonsiga cashuurbixiyaha waa tixraac namber(TIN) oo ay bixiso waaxda cashuuraha berrigu taas oo looga jeedo in lagu aqoonsado cashuur bixiyayaasha isla markaana cashuur bixiye kasta loo asteyn doono mid u gaar ah.

Tirsiga aqoonsigu waxa uu ku waajibay shaqsi kasta ama shirkad kasta oo ay ku waajibtay cashuur bixin iyo soo gudbin xisaabcelin, sidaa daradeed cashuurbixiyaasha leh laamo ganacsiyeed oo ku kala yaala meelo kala duwan waa inay lahaadan d hal TIN oo kaliya.

1.1 Nidaamka Isdiiwaangelinta

Waaxda cashuuraha berrigu waxay cashuurbisiyaasha u diyaarisay laba qaab oo ay isku diiwangelin karaan si ay u helaan Tirsiga Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha(TIN)

Habka manualka ah

Cashuurbixiyahu waxa ay si toos ah ugu tagayaan xafiisyadda cashuuraha berriga kaas oo uu ka helay adeega diiwaangelinta iyo bixinta tirsiga Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha(TIN)

Habka electronic-ga ah

Cashuurbixiyahu waxa ay si toosa u booqan karaa mareegta casriga (**online-taxpayer registration portal**) waaxda cashuuraha berriga taas oo uu si fogaan arag ah uu isku diiwangelin karo sidaana ku heli karo tirsiga Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha(TIN).

1.2 TIN-Ka iyo Cashuuraha waajibay

Cashuurbixiyahu marka uu buuxbuuxinayo foomka diiwaangelinta waxa uu dooranaya cashuuraha ku waajibay ee uu u isticmaalayo TIN-Kiisa si isxilqaan ah kuwaas oo kala ah

- **Cashuurta shaqaalaha (Employment income tax)**
 - **Cashuurta Ganacsiga shirkadaha (Corporate income tax)**
 - **Cashuurta ganacsiga shaksiyaadka(Individual income tax)**
 - **Cashuurta xakameyntha (Excise tax)**
 - **Cashuurta kiradda daaraha Cashuurta madaganayaasha Withholding tax**
 - **Cashuurta Ilbka adeega iyo badeecadaha (Goods and service tax)**
 - **Cashuurta kiradda daaraha (Rental income tax)**
-

1.3 Isticmaalid La'aanta Namabarka Tix-Raaca Cashuureed

Qofka isagoo og ama taxadir daro u isticmaala number tixraac cashuureed oo been ah, oo Ay ka mid tahay lambar aqoonsi cashuur bixiye kale lagu xisaab celiyay ama dukumenti ku qoran ama loo isticmaalo ujeedooyinka xeerkan, wuxuu galayaa dambi wuxuuna mudanaya xukun ganaax oo aan ka yarayn 20(currency point) ama xadhig mudadiisu aanu ka badnayn hal sano ama labadoodaba.

NB.wixii macluumadda dheerada ee aad u baahato la xidhiidha Xafiiska Xarunta Isdiwiangelinta Cashuur-bixiyaha oo kuyaala Xarunta Dhexe ee Waaxda Cashuuraha Berriga **TEL 4104241**

2 Soo Xareynta Xisaab-Celinta Cashuuraha

Cashuur-bixiyeh kasta oo leh sumadda aqoonsiga TIN cashuureed waxaa looga baahan yahay inuu soo xareeyo xisaab-celinta mid kasta oo ka mid ah waajibaadka cashuureed ee ugu diiwaan gashan TIN-numberkiisa, hadaba cashuurbixiyashu si iskood ah ayay u soo diyaarinayaan xisaab-celinta cashuuraaha ku waajibay, kuwaas oo ku soo gudbin doona foomamka xisaabcelinta ee ay u diyaarisay waaxda cashuuraaha berrigu.

Cashuur-bixiyeh kasta oo leh sumadda aqoonsiga TIN-ka isla markaasna aan kasban wax dakhli ah ama helin dhaqdhaqaaq ganacsi mudadaas waxa looga baahanyahay inuu soo xareeyo xisaabcelintiisa oo muujinaysa xaaladiisa madhan(Nil)

Shaxda hoose waxa ay ku tusaysaa waqtiyada sharciga ah ee soo xareynta xisaabcelinadda iyo Ganaaxyadda ka dhasha soo gudbin la,aanta iyo daahitaanka xisaabcelinta.



No	Nooca Cashuuraha	Ugu danbeyn	Ganaaxyadda
1	Cashuurta shaqaalaha	15-ka bisha bisha xigta	2% Ganaax
2	Cashuurta M/M/ Ganacsiga	30-ka bisha April.	2% Ganaax
3	Cashuurta kiradda daaraaha	30-ka bisha April.	2% Ganaax
4	Cashuurta libka(GST)	21-ka bilkasta	2% Ganaax
5	Cashuurta Madeganayaasha Withholding Tax	15-ka bisha bisha xigta	2% Ganaax

NB.wixii macluumadda dheerada ee aad u baahato la xidhiidha Xafiiska Xarunta xisaabcelinta cashuur-bixiyaha oo kuyaala Xarunta Dhexe ee Waaxda Cashuuraaha Berriga **TEL 4008577**

3 Macluumadka Cashuuraha Waa Weyn

3.1 Cashuurta Shaqaalaha

3.1.1 Maxay tahay cashuurtashaqaaluhu?

Cashuurta shaqaalahu waxay ku waajibtay dakhli kasta oo shaqaale ka soo gala shaqo sida uu sheegay qodobka 70aad ee Xeerka dakhliga cashuuraha berrigu waxaana ka mid ah qadarada soo socda:-

- Xuquuq Maalmeed, Mushahar, lacagta fasaxa loo qaato, fasaxa la lacageeyo, lacagta wakhtiga shaqada ee dheeraadka ah, ajuurooyin, lacagta faa'iido wadaaga ah, xuquuq shaqo ka tegis, abaal marin, jid-mar, madadaalo,
- Qiimaha dheef kasta oo la hibee yay
- Qadar kasta ama magdhaw uu bixiyo loo shaqeeye,
- Qadar kasta oo lagu helo xuquuq heshiis shaqo oo wakhtigiisii dhammaaday ha lagu muujiyo ama yaan lagu muujinin heshiishka xuquuqda noocas ah ama lagu heli karo oo ah qadar u dhigma heshiska shaqo.

3.1.2 Waa imisa tacriifadda cashuurta shaqaalahu?

Tacfriifadda Cashuurta shaqaalahu waa boqolkii ba lix (6%).

3.1.3 Side loo bixiyaa cashuurta shaqaalaha?

Loo shaqeeyaha ayaa bil walba ka reebaya shaqaalahiisa Cashuurta shaqaalaha isla markaasna isagaana bilkasta ku bixinaya xafiiska cashuuraha berriga ee ugu dhow.

3.1.4 Haddii aan la daaho maxaa dhacaya?

Haddii aad la habsaanto cashuurta shaqaalaha waxaa dhacaya ganaax 2%

3.2 Cashuurta Macaashka Ganacsiga

3.2.1 Waa maxay cashuurta macaashka ganacsigu?

Cashuurta macaashka ganacsiga waxa laga qaada faaidada dakhli kasta oo qof ka soo gala hawlgalo ganacsi



3.2.2 Waa imisa tacriifadda cashuurta macaashka ganacsigu?

Tacriifadda Cashuurta macaashka ganacsigu waa boqolkii toban (10%) ku dhacaysa faaiida ganacsiga

3.2.3 Side loo bixiyaa cashuurta macaashka ganacsiga?

Waxaa lagaga baahan yahay Xisaab-xidhka Cashuurta macaashka ganacsi-ga oo ah sannad le ugu danbayn bisha afraad ee sannadka cusub, Cashuur bixiyahu waxa keenaya xisaabceliintiisa Cashuurta macaashka ganacsi-ga waxaa lagu bixiyaa: sannad dakhliyeedkasta, oo macnaheedu yahay 12 bilood oo ay ugu danbyso 31 December.

3.2.4 Maxaa dhacayahadii aan la daaho?

Haddii aad la habsaanto cashuurta Macaashka ganacsiga waxaa dhacaya ganaax 2%

3.3 Cashuurta Kiradda Daaraha

3.3.1 Maxay Tahay Cashuurta kiradda daaraha?

Cashuurta kiradda daarahua waxa laga qaada faaidada qof kasta oo hela dakhli kiro”.



3.3.2 Waa imisa tacriifadda cashuurta kiradda daarahu?

Tacfriifadda Cashuurta waa boqolkii tobant (10%) dakhliga hantida

3.3.3 Side loo bixiyaa cashuurta shaqaalaha?

3.3.4 Maxaa dhacaya hadii aan la daaho?

Ia daahitaanka cashuurta kiradda daaraha waxaa ku dhacaya ganaax lacageed oo dheerad ku noqonaya cashuurtii 2%

3.4 Cashuurta libka Adeega Iyo Alaabta

3.4.1 Maxay Tahay Cashuurta kiradda daaraha?

Cashuurta Adeegga iyo iibka badeecaddu waxa weeye “Cashuurta ku waajibtay badeecadda la soo dejijo iyo badeecada laga soo saaro gudaha waddanka ee ku xusan qdobka 153-aad ee Xeerka dakhliga iyo adeegyada kala ah iibka biyaha, korontada, is-gaadhiisnta, adeegga hudheellada iyo socdaallada.



3.4.2 Waa imisa tacriifadda cashuurta libka Adeega Iyo Alaabta?

Taciifadda Cashuurta waa boqolkii shan (5%) ku dhacaysa iibka alaabta iyo adeegyadda



3.4.3 Side loo bixiyaa cashuurta libka Adeega Iyo Alaabta?

Cashuurta iibka alaabta iyo adeegyadda waxa Cashuurta ka reebaya iibiya, waxaa la bixiyaa: bil kasta marka ay dhammaato. Ugu danbayn kow iyo labaatanka (21) cisho ee bisha xigta, bishaa cashuurtu waajibtay.

3.4.4 Maxaa dhacaya hadii aan la daaho?

La daahitaanka cashuurta libka Adeega Iyo Alaabta waxaa ku dhacaya ganaax lacageed oo dheerad ku noqonaya cashuurtii 2%

3.5 Cashuurta Ka Reebka Madeganyaasha

3.5.1 Maxay tahay cashuurta Ka Reebka Madeganyaasha?

Waa cashuur ku waajibtay: dadka aan dalka degenayn ee dakhli ka hela gudaha dalka.

3.5.2 Waa imisa tacriifadda Cashuurta Ka Reebka Madeganyaasha?

Cashuurta withholding of non-residents waxaa la bixiyaa 10%

3.5.3 Side loo bixiyaa cashuurta Ka Reebka Madeganyaasha?

Cashuurta ma-daganayaasha waxaa ka reebaya wakiil cashuureed oo bixinaya lacagta cashuurta ma-daganayaasha ku waajibtay waxa la mid yahay loo shaqeyaha reeba cashuurta shaqaalihiisa oo kale, ka dibna cashuur-reebaha ayaa bixinaya bil walba cashuurtii uu reebay.

3.5.4 Maxaa dhacaya hadii aan la daaho?

la daahitaanka cashuurta ka reebka madeganyaasha waxaa ku dhacaya ganaax lacageed oo dheerad ku noqonaya cashuurtii 2%

3.6 Cashuurta Kala Wareejinta

3.6.1 Maxay Tahay Cashuurta kala wareejinta ?

Cashuurta kala-wareejintu waxa weeye: "Cashuurta ku waajibtey marka la kala iibsado hantida guurtada ah iyo ta ma-guurtada ah labada ba."

3.6.2 Waa imisa tacriifadda Cashuurta kala wareejinta?

Cashuurta Kala-wareejinta waxaa la bixiyaa: Hantida Guryaha, Beeraha iyo Dhulka cashuurtoodu waxa weeye 2.08% oo ku dhacay qiimaha guud ee iibka.halka gaadiidka ka tahay qiime go'an oo ah

- ⊕ Gaadiidka waa weyn \$121
- ⊕ Gaadiidka yaryar na waa \$76.

3.6.3 Side loo bixiyaa cashuurta Kalawareejinta?

Cashuurta kala-wareejinta waxa lagu bixiyaa: Foom- ka Cashuurta kala-wareejinta oo ay ku lifaaqan yahay heshiishkii iibka notaayada ee sharciga ah

3.7 Cashuurta Mashaariicda /Qandaraasyada

3.7.1 Maxay Tahay Cashuurta mashaariicda/qandaraasyadda ?

Waxaa weeye: "Waa cashuurta ku waajibtey Mashaariicda Qiimaha leh ee laga fulinayo gudaha dalka. Sida uu qabo xeerka cashuurta diwaan-gelinta Xeer Lr83 /96 ee lagu xusay jaantuska 7aad ee xeerka dakhliga Xeer Lr72/2016."

3.7.2 Waa imisa tacriifadda mashaariicda/qandaraasyadda ?

Waxaa la bixiyaa: Cashuur dhan 3.1% oo ku dhacaysa qiimaha guud ee Mashaariicda/Qandaraasyada

3.7.3 Side loo bixiyaa cashuurta mashaariicda/qandaraasyadda ?

Waxa lagu bixiyaa: Foom-(ka) u gaar ah Cashuurta Diwaan-gelinta oo uu ku lifaaqan yahay koobbi heshiiskii mashruucaasi.

Cashuurta Mashaariicda/Qandaraasyada waxa lagu bixinaya 15 Cisho oo ka bilaabmaya marka heshiishka mashruucaas la dhameeyo ama muddada heshiishka ku xusan ee kale ee la bixinayo lacag bixinta heshiishka iyo iwm).

3.8 Cashuurta waddo-marista gaadiidka

3.8.1 Maxay tahay cashuurta waddo-marista gaadiidku?

Cashuurta gaadiidku waxa weeye: "Cashuurta ku waajibtay waddo-marista gaadiidka".

3.8.2 Waa imisa tacriifadda cashuurta waddo-marista ?

Cashuurta waddo-marista gaadiidka inta la bixiyaa waxa ay ku xidhan tahay: nooca gaadhiga, tiiyoo loo eegayo HP- ga iyo tan-ka gaadhiga, waana qiime go'an oo ku xusan tacriifadda wadda-marista; ka akhri tacriifadda cashuurta waddo-marista ee dhammaadka buugga ku lifaaqan.

3.8.3 Side loo bixiyaa cashuurta waddo-marista gaadiidku?

Cashuurta waddo-marista Gaadiidka waxa la bixiyaa: lixdii bilood ba hal mar ama laba jeer oo kala ah bisha 1 ilaa bisha 6 iyo bisha 7 ilaa bisha 12 sannadkii ba. Iyo si sanadle ahba.

3.9 Cashuurta Moorka (Stamp Tax)

3.9.1 . Tacriifadda Cashuurta moorka

- Boqolayda Saami Quman Ee Cashuurta Moorka marka laga reebo mushaarooyinka iyo gunooyinka oo ah 1%; Boqolayda saami quman (proportional rate) ee lagu qaado moorka dakhliga (stamp duty) ama tan qiimaha (stamp tax) waxa weeyi 2.5%, iyadoo ku xidhan nooca dokumentiyada, noocyada qoraaladaasi waa sidan soo socota
- Cashuurta moorka ee saami quman (proportional) waxay ku waajibaysaa qofka waajibaadka lacag bixineed lagu leeyahay ee badeecadda iyo adeegga loo fidiyay,

3.9.2 waa imisa Nooca Cashuurta ?

Cashuurta moorku waa laba nooc mid xadidan iyo mid saami quman ah (FIXED OR PROPORTIONAL)

- Cashuurta moorka ee xadiddan waxa lagu waajibin doonaa tacriifo kaliya qoraalada iyo dokumentiyada sifaha gaarka leh, waxana la saari doona badanaa cashuurta mid kasta oo ka mida qoraaladaas iyo dokumentiyadaas.
- Cashuurta moorka ee saami quman waxay noqonaysaa boqolay la saarayo qiimaha la cashuurayo ee qoraalada ama dokumentiyada

4 Ajuurooyinka Adeegyadda Kale Duwan Ee Dawladda

4.1 Ajuuradda liisamadda ganacsiga

4.1.1 Waa maxay ajuuradda Liisamada Ganacsigu?

Ajuurooyinka Liisamada ganacsigu waxa weeye lacagta laga qaado qofkasta oo doonaya in uu samaysto liisan ganacsi oo cusub ama dib-cusbooneysiin.

4.1.2 Waa imisa tacriifadda ajuurooyinka liisamadda ganacsigu?

Ajuurooyinka Liisamada Ganacsiga waxay ku xidhan tahay darajada iyo nooca Liisanka oo loo eegayo Tacriifadda Liisamada, fadlan booqo websitka wasaaradda www.slmof.org kalana dag buuga tacriifadaha.

4.1.3 Side loo bixiyaa ajuurooyinka liisamadda ganacsigu?

Ajuurooyinka liisamadda ganacsigu ajuurooyinka Liisamada Ganacsiga waxaa loo bixiyaa sannadle kana bilaabmaya xilliga aad bixisay lacagta Khidmadda Liisanka.

4.1.4 Noocyadda Ganaax ee la xidhiidha liisanka ganacsiga

Tir	Sababta ganaaxa	Sharaxa	Xadiga Ganaaxa
1.	Cusboonaysiin waaya liisanka ganacsiga	hal bil kadib xiliga uu liisanku dhacay	10% cashuurta liisanka ganacsi
		laba bilood kadib xiliga uu liisanku dhacay	25% cashuurta liisanka ganacsi
		3 bilood iyo wixii ka badan xiliga uu liisanku dhacay	50% cashuurta liisanka ganacsi
2.	Liisan lumay ama Waxyeeloobay	Kadib marka ay Wasaaradda Ganacsigu xaqijiso in uu liisanka ganacsigu u lumay ama u waxyeeloobay masuuliyad daro	Waxa laga qaadaya ganaax dhan 5% cashuurta liisanka lumay ama waxyeeladu soo gaadhay
3.	Faldambyeedyada Lidka ku ah Liisanka ganacsi	Sida liisanka u adeegsada micno ka duwan ki loo siiyay, diida in uu liisanka tuso cidda awooda u leh ama bixisay liisanka, kireeya liisanka diida liisanka haddii lagu amro soo celinta liisanka, ama si badheedha ufala fical uu kaga baxsanayo cashuurta liisanka.	Ganaax lacageed oo u dhexeeyaa 3,000,000 ilaa 7,000,000 slsh
4.	Lagala noqday ama laga mamnuucay liisan ganacsi	Qofkasta oo lagu arko faldambyeed sida uu dhigayo xeerku, ee lagala noqdo ama laga mamnuuco liisan ganacsi, ee lagu arko ka ganacsiga shaygii laga mamnuucay	Ganaax lacageed oo u dhexeeyaa 4,000,000 ilaa 6,000,000 slsh

4.2 Ajuuradda Dal-Ku-Joogga ‘Fiisaha Deggennaanshaha’

4.2.1 Waa maxay ajuuradda Dal-Ku-Joogga ‘Fiisaha deggennaanshaha’?

Ajuuradda dal-ku-jooggu “fiisaha deggennaanshahu” waxa weeye lacagta laga qaado dadka sita ama haysta passport-ka ajaannib-ka ah, ajuuradda dal-ku-joogga (fiisaha deggennaanshahu) waxay ku waajibtaa cid kasta oo aan u dhalan waddanka ama dalkan jamhuuriyadda somaliland oo ajaannib ah.

4.2.2 Waa imisa tacriifadda ajuurooyinka Dal-Ku-Joogga ‘Fiisaha Deggennaanshaha’?

Ajuuradda Dal-ku-joogga (Fiisaha deggennaanshaha) waxa ay ku xidhan yahay kolba muddada uu rabo waxaana la bixiyaa:-

- Hal Bil waa \$77
- Seddex (3) billood na waa \$138
- Lix billood kana waa \$248
- Sannadka oo ah **\$306**)

Waxaana lagu bixiyaa: “Xafiiska Cashuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda ee ku yaalla laanta socdaalka.”

4.2.3 Side loo bixiyaa ajuurooyinka Fiisaha Deggennaashaha?

Habka iyo sida loo bixinayo ajuuradda dal-ku-jooggu waa sidan waxaad geynaysaa xafiiska laanta socdaalka, qaybta shisheeyaha

- Codsi lagu dalbanayo muddada joogitaanka dalka ee qofka ajaanib ka ah iyo
- Nuqulka (Copy) passport-ka qofka ajaanibka ah xafiiskaasa hubinaya ka dib u soo diraya xafiiska cashuuraha berriga ee laanta socdaalka ku yaal.

4.2.4 Hadii iiga dhaco fiisaha deggennanshahu maxaa igu dhacaya?

- Maalin kasta oo dheeradda ah waxa laguugu dhufanayaa \$5

4.3 Ajuuradda Ogolaanshaha Shaqo (Work Permit)

4.3.1 Waa maxay ajuuradda Ogolaanshaha Shaqo (Work Permit)?

Ajuuradda ogolaanshaha shaqo Waxa weeye lacagta laga qaado dadka ajaanib ka ah, ee loo ogolaaday in ay ka shaqaystaan gudaha dalka, waxaanay ku waajibtay qof kasta oo ajaannib ah oo shaqo ka haya ama ka doonaya gudaha dalka.

4.3.2 Side loo bixiyaa ajuurooyinka Ogolaanshaha Shaqo (Work Permit)?

Waxaa loo bixiyaa: "Waxa aad Juwan lacag-qabasho ka soo goosanaysaa Xafiiska Cashuuraha Berriga ee ku yaal laanta socdaalka."

Waxaa lagaaga baahan yahay:-

- Arji codsi ah
- Iyo ogolaanshihi joogitaan kaaga

5 Xafiisyadda Cashuuraha Berriga

5.1 Xaggee Ayey Ku Yaallaan Xafiisyada Cashuuraha Berrigu?

Xafiisyada Cashuuraha berrigu waxa ay ku yaallaan, Gobolka Maroodi-jeh, Awdal, Togdheer, Sahil, Sool, Sanaag, Saraar, Gabley, Oodweyne, Baligubadle iyo guud ahaan degmooyinka dalka oo dhan.



5.2 Wakhtigee ayey shaqeeyaan xafiisyada cashuuraha berrigu?

Xafiisyada Cashuuraha berrigu waxa ay shaqeeyaan, 7:00 subaxnimo ilaa 2:00 duhurnimo. Sidoo kale waxaa jira xafiisyo cayiman oo gelinka dambe shaqeeya dhammaan gobollada dalka.

5.3 Ciwaannadee ayaan kala xidhiidhi karaa xafiisyada cashuuraha berriga?

Ciwaannada aad kala xidhiidhayso Xafiisyada Cashuuraha berriga waxaad ka helaysaa mareegta wasaaradda maaliyadda lifaaqa Web: www.slmof.org.

5.4 Xaggee ayaan ka heli karaa xog ama maclumaaad cashuureed?

Waxa aad xog ama maclumaaad aad ka heli kartaa dhamaan xafiisyada Cashuuraha Berriga ee gobol kasta. Sidoo kale waxaad xog ka heli kartaa xafiisyadan kala ah:

- Xafiiska Xogsiinta Cashuur-bixiyaha ee Xarunta Cashuuraha Berriga **TEL: 3535** Web: www.slmof.org.
- Xafiisyada Xogsiinta Cashuur-bixiyaha ee Xarumaha Degmooyinka Gobolka Maroodi-jeex-**520762/4229502**
- Xafiisyada Xogsiinta (One Stop Shop) ee ku dhuxyaala Wasaaraddaha Ganacsiga, wershadaha iyo Dalxiisa, Cadaaladda, Hawlaha Guud & Gaadiidka iyo xarunta Ciidanka Laanta Socdaalka. **0634470275**
- Xafiiska Cashuuraha Berriga ee Rugta Ganacsiga. **4086638**